North Central London
Integrated Care Board

# Macluumaadkaaga caafimaadka iyo daryeelka ayaa gacan ka gaysan kara horumarinta adeegyada

Guud ahaan Waqooyiga Bartamaha London (NCL), waxaan rabnaa inaan ka hortagno dadka inay xanuunsadaan, wax u qabano si degdeg ah marka ay xanuunsadaan, ka taageerno sidii ay u maareeyn lahaayeen caafimaadkooda sida ugu wanaagsan, isla markaana aan yarayno sinnaan la'aanta xagga caafimaadka.

GP-yada, isbitaalada, bixiyeyaasha daryeelka, iyo ururada mutadawiciinta ah ayaa si wadajir ah uga shaqeynaya sidii ay u taageeri lahaayeen nolol caafimaad leh inay helaan dhammaan dadka deegaan ah. Waxaan isku daraynaa diiwaannadaada caafimaadka iyo daryeelka waxaanan u isticmaaleynaa macluumaadkan inuu naga caawiyo qorsheynta iyo naqshadeynta adeegyada wanaajin doona caafimaadka, badqabka, iyo daryeelka dhammaan dadka deggan NCL.

## Maxay arrintani adiga kaaga dhigan tahay?

Xogta laga helo NHS-ta deegaankaaga iyo diiwaanada daryeelka waxa lagu xiriirin doonaa xogtaada daryeelka caafimaadka qaranka (haddii aad ka heshay adeegyada NHS adigoo jooga meel ka baxsan London) iyadoo la isticmaalayo lambarkaaga NHS, magacaaga, taariikhdaada dhalashada iyo cinwaankaaga si loo hubiyo in tani sax tahay, iyo in aanu hayno diiwaan dhamaystiran.

Xogtan ayaa markaa laga saari doonaa magacaaga iyo wax kasta oo kale oo lagugu aqoonsan karo ka hor inta aan loo isticmaalin falanqayn iyo qorsheyn.




Tani waxay taageeri doontaa hawlaha:

- lagu aqoonsanayo kooxaha halista ugu jira cudurrada laga hortagi karo ama la daweyn karo
- lagu suurtagelinayo ka-hortag ka fiican iyo daryeel firfircoon
- gacan ka gaysanaya qorsheynta iyo horumarinta helitaanka adeegyada

# Waa maxay faa'iidooyinka aan ka helayo in xogtayda la iskugu xiro habkan?

Iyadoo laga yaabo inaadan isla markiiba faa'iido ka helin, wanaaga ka dhalan doona adeegyada waxay anfici doontaa adiga, qoyskaaga, ama bulshadaada. Hadafkayagu waa in aan wanaajino caafimaadka qof walba, annagoo diiradda saarayna kooxaha kala duwan kuwaas oo leh natiijooyin ka xun intii aan filaynay.

Waxaan u isticmaaleynaa xogtan in aan diiradda ku saarno seddex meelood oo waaweyn:

1. Kahortagga iyo waxqabadka hore.
2. Daryeel la isku daray oo badan.
3. Qiimaha ugu wanaagsan ee lagu heli karo lacagta.

## Waa maxay macnaha 'isticmaalka labaad/dheeraadka ah'?

In xogtaada caafimaadka iyo daryeelka loogu isticmaalo qorshaynta qaabkan waxa loo yaqaan 'isticmaalka labaad/dheeraadka ah' maadaama aanay la xiriirin daryeelkaaga shakhsi ahaaneed.

## Yaa heli doona xogtayda caafimaadka iyo daryeelka?

Ujeedooyin loo yaqaan isticmaalka labaad/dheeraadka ah awgood (ka eeg xagga sare), helitaanka tooska ah ee xogtaada shakhsi ahaaneed ayaa la oggol yahay keliya marka la isku xirayo xogtaada. Arrintaas waxaa sameeya koox gaar ah oo horumariyayaal ah oo ka tirsan Guddiga Daryeelka Isku Dhafan ee NHS North Central London (NCL).

Xogta la abuuray waxaa laga saari doonaa macluumaadka gaarka ah (sida magaca, cinwaanka, taariikhda dhalashada) ka hor inta aan la isticmaalin waxaana heli doona oo kaliya dadka ka shaqeeya daryeelka caafimaadka iyo bulshada ee Waqooyiga Bartamaha London (GP-yada, isbitaalka NHS iyo adeegyada bulshada , Guddiga Daryeelka Isku-dhafan ee NCL, iyo maamulada deegaanka ee NCL). Waxay u heli doonaan oo keliya macluumaadkan mashaariicda ujeeddadoodu tahay horumarinta adeegyada. Macluumaadkan ma heli doonaan shirkado gaar loo leeyahay ama hay'adaha cilmi-baarista.

## Xog noocee ah ayaa lagu dari doonaa?

Xogta waxaa ku jiri doona taariikhaha, natiijooyinka booqashooyinka isbitaallada, ballamaha soo socda, gudbinnada, daawooyinka la qoray, xasaasiyadaha, baaritaannada (sida baarista dhiigga), cudurada la sheego, qorshooyinka taageerada, iyo arrimaha khatarta ah (sida sigaar-cabista).

Waxa kaliya oo aan ku dari doonaa qaybta caadiga ah ee diiwaanka daawaynta, sida daawooyinka la qoray, akhrinta caafimaadka, iyo taariikhaha. Wax faallo ah ama qoraal ah laguma dari doono.

## Maxaa dhacaya haddii aanan rabin in xogtayda caafimaadka iyo daryeelka loo isticmaalo habkan?

Waxaad leedahay xulasho. Haddii aadan rabin inaad xogtaada noola wadaagto ujeedooyin aan ahayn daryeelkaaga tooska ah, waad "diidi kartaa". Tani waa xaq aad adiga leedahay. Si kastaba ha ahaatee, waxaan kaa codsanaynaa inaad si taxadar leh uga fikirto kahor inta aadan diidin/iskaga bixin. Wadaagista macluumaadkaaga caafimaadka iyo daryeelka bulshada waxay noo sahlaysaa inaan qorshayno oo aan bixino adeegyo taageera baahiyaha qof kasta oo ku nool Waqooyiga Bartamaha London. Si ay arrintani si fiican ugu shaqeyso, waxaan u baahanahay inaan helno sawir dhamaystiran hadba intii suurtagal ah. Runtii aad ayaan u qadarinaynaa kalsoonida aad nagu qabto waxaanu xogtaada ula dhaqmi doonaa si xushmad leh.

# Sida looga baxo/loo diido

Waxaad ka bixi kartaa/diidi wadaagista xogtaada ee habkan wakhti kasta adiga oo buuxiya foomka hoose kuna soo diraya boostada:

**FREEPOST NLP – JOINED UP CARE RECORD**

Waxaad sidoo kale nuqul kala soo degi kartaa websaydkeena:
nclhealthandcare.org.uk/digital

Foomamka la soo dejiyay waxaa loo soo diri karaa si elektaroonig ah iimayl ahaan iyadoo la isticmaalayo cinwaanka hoose. Si kastaba ha ahaatee, maadaama iimaylka aanu lahayn sir-qarin, kuma talineyno inaad u soo dirto macluumaadkaaga sirta ah qaabkaas.

**Nala soo xiriir**
Waxaad la xiriiri kartaa qaybtayada caawimaada si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah.

**Iimayl: nclicb.digitalhelpdesk@nhs.net**

**Taleefan: 0203 198 8738**

Haddii aad rabto inaad ka baxdo/diido in xogtaada loo isticmaalo ujeedooyinka labaad, fadlan buuxi foomkan oo soo celi. Fadlan ku dar macluumaadka xiriirka si aad u hesho xaqiijin.

Magaca hore*: ..............................................................

Magaca dambe*: ..............................................................

Taariikhda dhalashada*: ..............................................................

Lambarka NHS*: ..............................................................

Jinsiga: ..............................................................

Cinwaanka iimaylka: ..............................................................

Cinwaanka boostada*: ..............................................................

Koodhka boostada*: ..............................................................

Foomkan ma waxaad u buuxinaysaa qof kale?

☐ Haa ☐ Maya

Hadday haa tahay, waa maxay xiriirka kaala dhaxeeya qofkan? Fadlan calaamadeey hadba sida ku habboon:

Qofka aan foomkan u buuxinayo:

☐ waxa uu ka yar yahay 16 jir aniguna waxaan ahay mas'uulkooda sharciga ah ama waxaan leeyahay mas'uuliyadda waalidnimo.

☐ ma laha awood uu ku bixiyo ogolaanshaha waxaanan leeyahay awooda u gaarista go’aanada ama Masuuliyadda Ilaalinta ee Maxkamada dhanka caafimaadka iyo daryeelka.

Fadlan sax sanduuqa hoose:

☐ Waan akhriyay oo fahmay buugyarahan

Magacaaga oo buuxa: ........................................................................................................

Saxeexa: ........................................................................................................................

Waxaad foomkan ku soo diri kartaa lacag la'aan, baqshad xiran, adigoo ku soo hagaajinaya:
**FREEPOST NLP – JOINED UP CARE RECORD** (aan lahayn koodh boosto)

*Kama shaqayn karno codsigaaga iyadoon la helin macluumaadkan.